**Sharciga 30 Juun 1957, lamba. 12**

**Sharciga ku saabsan beerista iyo qudho-bixinta suufka Soomaaliya.**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Xeer Dejinta;

**SOO SAARAYAA OO MEELMARIYAY**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1**

Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha wuxuu sanad kasta ku go'aaminayaa dekereetadiisa, nawaaxiga dhulka lagu beerayo suufka.

**Qod. 2**

Abuurka suufka Dalka waxaa keenaya Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha – Waaxda Beeraha.

Abuurka ka soo baxa hawlaha qurdh-bixinta waa in lala soo socodsiiyaa Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha iyadoo meelayntiisana shardil looga dhigayo marka hore in ay oggolaato isla Wasaaradda si loo hubiyo tayada iyo shuruudaha looga baahanyahay.

Waxaa ku waajiba qurdh-bixiyeyaasha in ay ka iibiyaan abuurka la beerayo dadka codsigooda ay Wasaaradda Arrimaha Dhaqalaha u soo oggolaatay, hadba tirada la weydiisto Wasaaradda marka la bilaabayo qurd-bixinta iyagoo ka xulanaya.

**Qod. 3**

Haysashada abuurka suufka iyo wareejinta meel kale loo wareejinayo waa mamnuuc iyadoo aan oggolaasho cad laga haysan Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha.

Qofkii haysta ama wareejiya abuurka suufka iyadoo aan laga haysan oggolaashaha Wasaaradda ArrimahaDhaqaalaha, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ah Sh. So. 2.000. Garsoruhu marka u xukunka ridayo wuxuu amarayaa in lala wareego abuurka.

Haddii la bilaabo beerista abuurka sida sharci darrada dalka lagu soo galiyay, lagu haysto ama la soo qaaday, waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ku xusan faqradda ugu dambaysa ee qod. 5.

**Qod. 4**

Wassaradda Arrimaha Dhaqaalaha waxay si gaara u yeelanaysaa in ay si toosa u samayso cayaan-buufinta abuurka la beerayo oo ka dhaca goob kasta oo qudh-bixin. Waxaa kale korkooda ah qudh-bixiyaha iyo midka qaadanayaa ina waqtiga habboon jawaanno ku guraan abuurka muddo aan ka badnay shan iyo toban cisho ka dib marka la qudh-bixiyay. Jawaanada waxaa niggaxayaa Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha – Waaxda Beeraha.

Abuurka aan ku habbonayn beerista waxaa loo qoondaynayaa isticmaalka warshadaha. Abuurka isticmaalka warshadaha oo la beero waaxaa ka ratimaya ganaax ah Sh. So. 100.

**Qod. 5**

Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha sanad kasta wuxuu muddaynayaa xilliga wax la beerayo, noocyada iyo qaybaha kala duwan ee suufka nawaaxiga kasta lagu beerayo, waqtiga ugu yar ee lagu abuurayo iyo kan ugu badan ee la ciribtirayo iyadoo lagu burburinayo dab haraadiga wixii

la beeray, haddii aan loo hoggaansamin xadkii loo gooyay, waxaa lagu mutaysanayaa ciqaab ah Sh. So. 200 illaa 800.

Xaaladaha gudasha la'aanta ku xusan faqradda labaad Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha wuxuu amrayaa qofkii beeray in uu burburiyo wixii la beeray.

**Qod. 6**

Suufka la xooray waa in looga shaqeeya meel ka mida goobaha qudh-bixinta oo ka mida nawaaxiga wax lagu beeray. Waxaa ku waajiba hawlaha qudh-bixinta in ay ka shaqeeyaan suufka la xooray ee kala nooca ah ama meel kale oo taas ka duwan laga keenay waqtiyo dambe markii sii fiican loogu nadiifiyo qalabka shaqada loogu talagalay.

Wasiirka Arrimaha Dhaqaale wuxuu u oggolaan karaa beeraleyda, haddii loo baahdo in sufka lagu uruuriyay meel kale oo wax lagu qudh-bixiyo oo ka baxsan nawaxigaaas. Dadka aan fulin amarkaan waxaa lagu ciqaabi ganaax ah Sh. So. 100 illaa 500.

**Qod. 7**

kasta oo doonaya in uu sameeysto goob qudh-bixin waa in uu codsi u soo qortaa Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha isagoo ku soo lifaaqaya tilmaanta goobta, suurtagalnimada shaqaynta, habaynta iyo baaxadda goobaynta, dabeecadda rakibaadda sancada.

Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha wuxuu bixinayaa ruqsadda hawlqabadka.

**Qod. 8**

Hawlgallada qudh-bixinta waa in lagu dhammaystiraa muddadii uu u qabtay Wasiirku Arrimaha Dhaqaalahau. Dhammaan xirmooyinka yaalla goobbaha qudh-bixinta marka ay dhammaato waqtiga hawsha lagu dhammaystiri lahaa qudh-bixinta waa lala waregayaa waxaana loo dhiibayaa Waaxda Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha.

Maamulayaasha goobta qudh-bixinta waa in ay soo wargeliyaan Waaxda la soo sheegay, shaniyotoban cisho ka hor, inta aan shaqada la bilaabin.

**Qod. 9**

Xuubka suufka waxaa loo qaybinayaa dabaqado lagu kala sooco " halbeegga munadayn rasmi ah" iyadoo samballo ka mida lagu kaydinayo Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha iyo Rugta Ganacsiga. "halbeegga muunadaynta rasmiga ah" waxaa diyaarinaya Guddi kala sooca oo uu soo magacaabo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha. Iyagu waxay soo qaabaynayaan nooc kasta oo suufka Dalka laga beero.

**Qod. 10**

Waxaa laga sameeyay, Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha "Buugga kala soocidda suufka" Kala soocayaasha si ay u helaan Diwaangelinta Buugga waa in ay caddeeyaan in ay leeyihiin shuruudaha nidaamka guud iyo nidaamka farsamada xirfadeed si waafaqsan hadba shuruucda la soo saaray oo uu la socoto nidaamka Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha ay u dejisay.

**Qod. 11**

Daneeyeyaasha waxay awoodaan in ay dood ka keenaan kala saaridda kala soocayaasha, in ay cabasha u soo gudbiyaan Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha codsi sababaysan ee khabiir

gaara soo maray si ay uga dhaadhiciyaan kala soocidda ugu dambaysa xagga Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha -- Waaxda Beeraha.

Kala Soocayaasha waxay masuul ka yihiin kala saaridda xirmooyinka iyo waafaqsnaanta xuubka iyo halbeegga muunadda rasmiga ee dabaqadaha la xushay ee iyaga loo qoondeeyay. Xirma kasta waa in uu u leeyahay magaca kala duwan oo ku daabacan, lambarka iyo magaca la soo gaabshay ee qaybta, magaca iyo lambarka qudh-bixinta soo saaray iyo waraaq ama magaca gaaban oo u dhigma kala- soocaha kala saaray xuubka. Qudh-bixiyeyaasha waa in ay haystaan diiwaan gaara oo laga helayo wax kasta oo la qudh-bixiyay, tirada xirmooyinka la baakadeeyay, miisaankooda iyo magac gaaban ee la xariira, si waafqsan faqradda kore, sidoo kale magaca milkiilaha iyo goobta laga keenay.

Kuwa jabiya sharciga kor xusun qodobka kore waxa lagu ganaxayaa Sh. So.1.000 illaa 1.000.

**Qod. 12**

Waxaa la dhisay guddiga qiimaha oo ka kooban:

1) Guddoomiye: Madaxa Waaxda Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha ama cidda ku xigta, oo ay wehliyaan kubaro xirfadlayaal ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha iyo Wasiiro kale oo xilkodu latalin yahay;
2) Xubnaha:
   a) —Khabiir ka socda Waaxda Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha;
   — Khabiir suufka oo ka socda Waaxda Warshadaha;
   — Madaxa Waaxda Ganacsiga;
   b) — siddeed wakiillo kuwa wax beerta oo ah Soomaali, wax qori kara waxna akhri kara.
   Sanad kasta waxaa loo soo qoondeynayaa sida soo socota:
   laba uu uu soo magacabo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir;
   hal qof uu soo magacaabo Guddoomiyaha Gobolka Jubbada Hoose;
   hal qof uu soo magacaabo Guddoomiyaha Jubbada Sare;
   hal qof oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Gobolka Hiiraan;
   hal qof oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Gobolka Mudug;
   hal qof oo uu soo magacaabo Gobolka Majeerteenya;
   c) — siddeed wakiil oo ka socda ganacsatada iyo warshadleyda oo sanad kasta Rugta Ganacsiga ay soo magacawdo.
   Guddiga la soo sheegay sanad kasta waxay goynayaan:
   — qiimaha qudh-bixinta;
   — qiimaha abuurka la beerayo;
   — qimaha abuurka loo isticmaalayo warshadaha.

**Qod. 13**

Waxaa la naqilay amarka lamba. 3 ee 21 Maaarso 1952, lamba. 14 ee 19 Juulay 1953, lamba. 4 3 Febberaayo 1956, dekereetooyinka lamba. 51 ee 26 Abril 1951, lamba. 155 ee 8 Oktoobar 1953, lamba. 189 ee 17 Disember 1953, lamba. 76 ee 7 Agoosto 1955, Dekeretada-Xeerka lamba. 5 ee 25 Maarso 1957.

**Qod. 14**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Fafinta Rasmiga. Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga waxaana lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga. Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansato iyo inay ay ilaaliyaan ka xeer Soomaali ahaan.

Muqdisho, 30 Juun 1957.

P. Maamulaha

**P. Francca**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**